

Cudurka
qaaxada (TB)
waa la
daaweyn
karaa

Waxa jira
macluumaad badan,
caawimo iyo gargaar
loogu talagalay dadka
uu saameeyay
cudurka **qaaxadu**

Haddii aad ka wel-welsantahay in aad qabto cudurkan qaaxada, raadso baaris iyo daawayn. Haddii lagugu sheegay cudurka qaaxada, raadso macluumaad ku saabsan sida lagaaga caawin karo qaadashada daawada- Run ahaan aad ayay muhiim u tahay inaad sidaa yeesho si aad hore ugu raysato oo aanad u noqon qof aan dawadu waxba ka tarin amma aanad dadka kale ugu gudbin cudurkan qaaxada.



Waxa laga yaabaa inaad walaac ka qabto isticmaalka adeegyada caafimaad ee dalkan Ingiriiska. Waxaaba dhici karta inaad dareen ka qabto xagga asturaadda ammaba inaan arrintaada tixgelin mudanba aan la siin. Haddaba waxa muhiim ah in la ogaado in baadhida iyo daaweynta Adeegga Caafimaadka Qaranka (NHS) ay tahay mid xafidan oo aan la shaacin. Takhaatiirta adiga ayay diyaar kuu yihiin, xaalkaagana tixgelinta uu mudan yahay ayay siinayaan haddii aad u sheegto inaad wal-wal ka qabto cudurka qaaxada. Waxa laga yaabaa inaad door bidayso inaad aragto Takhtar dheddig ah, markaa way kuu bannaan tahay inaad mid codsato. Haddii aad u baahantahay turjumaan, waad codsan kartaa amma waxad soo kaxaysan kartaa qof aad ku kalsoontahay oo kuu af celiya — tusaale ahaan qof ka tirsan ururka gargaarka Soomaaalida ee degaanka aad ku nooshahay.

SIDA LOO HELO MACLUUMAAD IYO TAAGEERID

Adeegga foojignaanta cudurka qaaxada:

Telefoon: 01273 234770

email: info@tbalert.org

www.thetruthabouttb.org

Caawin iyo talo ku socota dadka ka wel-welsan cudurkan qaaxada

TB Action Group (TBAG)

Telefoon: 01273 234770

<http://tb-alert.healthunlocked.com/>

Waa koox aad ka mid noqon karto oo u doodda, gargaartana dadka uu saameeyay cudurka qaaxadu

NHS Choices

Telefoonka: 111

www.nhs.uk

Waxa laga helaa macluumaad ku saabsan qaaxada, waxana laga heli karaa adeegyada kale ee loo baahdo

THE
TRUTH
**ABOUT
TB**

Xaqiiqada
ku saabsan
cudurka
qaaxada
ee khusaysa bulshada
Soomaalida



WAA MAXAY CUDURKA QAAXADA (TB)?

Qaaxadu waa cudur la dawayn karo oo ay sababto bakteeriyada hawadu siddo (Germs). Tirada dadka u xanuunsanaya cudurka qaaxada ee waddankan Ingiriiska (UK) way sii kordhaysaa. Badanka dadka qaba cudurka qaaxadu waa dadka xiriirka la leh wadamada ay qaaxadu ku badan tahay, sida bulshooyinka ka soo jeeda koonfurta qaaradda Aasiya (Hindida, Bakistaanta), iyo kuwa ka soo jeeda Afrika (Sida Soomaalida iwm), inkastoo ay saamayn karto cid kasta.

SIDEE AYAA LOO QAADAA CUDURKA QAAXADA?

Marka uu qof qaba cudurka qaaxadu qufaco amma hindhiso, ayaa hawada waxa raaca dhibco wata jeermiska Qaaxada (TB). Haddii aad neefsato hawadaas waxa aad halis u tahay inaad qaaddo cudurka qaaxada. Caadi ahaan habka dabiiciga ee is-difaaca jidhka ayaa masaxa wixii jeermis ah. Xataa haddii uu wada layn kari waayo habka is-difaacu, way yar tahay fursadda aad markiiba u xanuunsan kartaa. Jeermisku jidhkaaga ayuu iska dhex jiiifi karaa oo ma xanuunsanaysid, cid kalena cudurka ma gaadhsiin kartid. Balse mararka qaarkood ayuu jeermisku soo toosi karaa oo aad uga xanuunsan kartaa cudurka qaaxada. Waxa laga yaabaa inay sidani dhacdo sannado kaddib markii u horraysay ee aad neefsatay hawadii jeermisku la socday.

ASTAAMAHA

Cudurka qaaxadu (TB) wuxu inta badan saameeyaa sambabada, waxase uu saamayn karaa qab kasta oo jidhka ah. Astaamaha ugu caansan ee lagu aqoonsado waa:

- qufac socda in ka badan saddex toddobaad
- miisaanka oo is dhima
- xummad
- dhidid habeenkii ah
- daal xad-dhaaf ah
- nafsadda cuntaynta oo lunta

Astaamaha cudurka qaaxadu waxa laga yaabaa in ay u soo baxaan si tartiib ah. Waxa laga yaabaa in aad wada yeelan astaamaha oo dhan, astaamaha qaaxaduna waxay u ekaan karaan kuwa cudurro kale. Isticmaalka qaadku wuxu qarín karaa astaamaha cudurka qaaxada.

Waxa jira fikrado badan oo khaldan oo laga fahansan yahay cudurka qaaxada (TB)

Dad badan ayaan ogayn in la dawayn karo. Waa la dawayn karaa! Dawaynta cudurka qaaxaduna waa u bilaash (bilaa lacag) cid kasta oo u baahan. Dad kale waxay u maleeyaan in cudurkani is-taabashada lagu kala qaadi karo ammaba uu yahay mid la kala dhaxlo. Qaar kale waxay rumaysan yihiin in cudurkan qaaxada laga qaadi karo koobabka amma saxamada ay isticmaaleen dad qaaxada qabaa, amma iyaga laftooda oo la taabtaba. Hase yeeshee cudurkan waxa laga qaadi karaa keliya adigoo neefsada jeermiska— Iftiinka qorraxda oo la soo daayo iyo daaqadaha oo la furto ayaa wax ka tari kara in la joojiyo jeermiskaas.



AN IGU HALIS MA U AHAY INAAD QAADDO CUDURKA QAAXADA (TB)?

Cid kasta ayaa qaadi karta cudurka qaaxada Laakiin Bulshada Soomaalida ee ku nool dalkan UK ayaa u sii halis badan waayo:

- Waxay xiriir la leeyihiin meel dunida ka mid ah oo cudurka qaaxadu uu ku badan yahay.
- Waxa ay u badan tahay inay wakhti door ah ku qaataan meelo ay si sahlan ugu faafi karto qaaxadu. Guryaha ay dadku ku badan yihiin amma meelaha ay bulshadu isugu timaaddo, sida meelaha qaadka lagu cuno ayaa ka mid ah meelaha uu cudurka qaaxadu si dhib yar ugu fido.
- Waxa laga yaabaa in ay ku nool yihiin dakhli yar, taasi oo keeni karta ciriiri, kuna adkaato inay awodaan cunto nafaqo badan. Taasina waxay wiiqi kartaa habka is-difaaca jidhka oo ah habka dabiiciga ah uu jidhku iskaga difaaco cudurrada ay ka mid tahay qaaxadu.
- Isticmaalka qaadku wuxu daciifin karaa habka is-difaaca jidhka, nafsadda cuntadana wuu saameeyaa. Haddii cunto kugu filan aad cuni waydo waxay iyaduna daciifin kartaa habka is-difaaca jidhka.

TALLAABADEE AYAAD QAADI KARTAA?

Haddii aad isku aragto astaamaha qaaxada (TB), waa inaad:

- u tegto takhtarkaaga guud (GP) iyo u sheeg inaad ka wel-welsan tahay qaaxada.

Haddii aadan qabin takhtar guud, waa inaad:

- tegtaa xarunta NHS ee kuu dhow iyo weydii sida la isku qoro rugta caafimaad ee takhtarka guud (eeg macluumaadka iyo taageerada ku qoran dhinaca dambe ee bug-yarahaan)

Haddii aad si darran u jiran tahay – tag qaybta Deg-degga (A&E) ee isbitaalka kuu dhow.

Haddii aad tahay magan-galyo doon ama qaxooti goor dhow dalka yimid, waxaad talo ka codsan kartaa shaqaalahaada taageerida.

Haddii aad cudurka waqti dheer waxba ka qabanin, si ka darran ayaad qaaxada u dareemi doontaa, waxaana kordhi doono suurtogalnimada in qaaxadaadu sii xumaado ama qof kale u gudbisno.

qufac socda in ka badan saddex toddobaad

miisaanka oo is dhima

xummad

dhidid habeenkii ah

daal xad-dhaaf ah

nafsadda cuntaynta oo lunta